

## Fursado shaqo oo khafiif ah

Wax ma ka maqashay ganacsi samaysiga khafiifka ah iyo waxqabadka isku tagga saamilayda? Qaabka ganacsiga ah ee sida caadiga ah loogu shaqaysto kasakow waxa kuu suuro gal ah in aad noqoto ganacsade qaab khafiif ah u shaqaysta oo qayb ka noqda isku tag saamilay. Taas oo kuu suuro galinaysa in aad u shaqaysato qaab kaa yaraynaya jaaniska khasaaraha.

## Ganacsadenimada khafiifka ah

Ganacsadeha khafiifka ah waa shaqsi ku shaqaysta magaciisa marka uu ku dallacayo macaamiishiisa lacagta shaqada uu u qabtayna uga faa'idaysanaya adeegga diridda biilasha. Taas waxay ka dhigantahay in ganacsadeyaasha khafiifka ah ay macaamiil u yihiin adeegga diridda biilasha. Markaad tahay ganacsadaha sida fudud u shaqaysta waxa ad awoodda saari kartaa soo helidda macaamiisha shaqadaada iyo kobcinta fikirkaaga ganacsi. Arimaha la xidhiidha diridda biilasha, bixinta mishaarka iyo ka shaqaynta warqadaha sharciga u ah in ay shirkadu qorto waxa kuu qabanaya shirkadda ad macaamiilka ka tahay. Ganacsadenimada khafiifka ah ma aha magac sharciyaysan oo sharciga lagu isticmaalo laakiin waa magac ay isticmaalaan shirkadaha isku tagga saamilayda ah marka ay isku xayaysiinayaan macaamiishooda.

Ganacsadenimada khafiifka ah waxay ku habboontahay ku dhawaad nooc kasta oo ganacsi loo samaysto ee qofku uu iibinayo aqoontiisa iyo shaqada shaqsiga ah ee uu qabanayo. Ganacsadenimada khafiifka ah waa fursadda ugu fiican ee ad qaadan karto marka anad wali hubin inta uu ganacsigaagu macaash dhalin karo. Haddii ad hesho shaqo badan oo ad u aragto in aad jeclaysanayso qaabka ad u shaqaynayso waxa kuu fudud adiga oo fahansan qaabka ay shaqadaadu u socoto in aad aasaasato magac shirkadeed oo ad ku shaqayso ama shirkad saamilay ah.

Qofku ganacsade khafiif ah ayuu noqon markaa isagoo xirfad kasta ka dhiganaya ganacsi inta anan ka ahayn shaqooyinka u baahan idinka ama sharciga gaarka ah ee lagu shaqaysto (sida tusaale ahaan samaynta khamriga, iibintiisa iyo ganacsiga u saabsan boostada)

Ganacsadeyaasha khafiifka ah waa dad shaqooyin aad u badan oo kala duwan ka shaqeeya, waxay noqon karaan khabaro, dadka qoraaladda shabakadaha internetka ku qora, dadka Freelance-nimada ku shaqeeya, farshaxanka dadka ka shaqeeya, dadka dhismaha iyo dib u habaynta ka shaqeeya, nadaafadda dadka ka shaqeeya iyo dadka turjumaadda qoraaladda ka shaqeeya. Ganacsade khafiif ah kuma haboona inaad noqoto haddii ad rabto inaad iibsado qalabaad culus ama ad noqoto qof iibiya alaabta jumladada ama tafaariiqda lagu iibinayo.

Adeegyada biilasha lagu dirsado ee bixiya fursadda ganacsadenimada khafiifka ah waxa ka mid ah Ukko.fi, OP Kevytyrittäjä, Omapaja, Eezy iyo Odeal.

## Ganacsadenimada khafiifka ah iyo taakulaynta shaqo la'aanta

Ogoow, marka ad tahay ganacsade si khafiif ah u shaqaysta sharciga ku saabsan taakulaynta shaqo la'aanta in laguugu qiimayno in aad tahay qof ganacsade ah. Marka ad tahay ganacsade wakhti buuxa shaqaynaya xaq uma lihid in aad qaadato taakulaynta shaqo la'aanta. Xafiiska shaqada ayaa qiimayn kara in aad tahay ganacsade wakhti buuxda shaqeeya iyo in aad ad tahay ganacsade wakhti kooban shaqeeya, haddii shaqada ad qabato uu xafiiska shaqadu ku qiimeeyo in ayna kuu

Työmahdollisuuksia kevyemmin, somalin kieli

suuro galinaynin in aad shaqo kale oo wakhti buuxa ah ad qaban karto. Sababtaas darteed waxa fiican in ad la kaashato xafiiska shaqada kahor inta anad noqonin ganacsade khafiif ah. La talinta arrimaha taakulaynta shaqo la'aanta ee xafiiska shaqada waxad ka heli kartaa (tel. 0295 020 701, waxa la heli karaa isniin-jimce saacadda 9–16.15) la talin ku saabsan xaaladaada gaarka ah saamaynta ay ku leedahay taakulaynta shaqo la'aanta.

Soo xigasho: [ww.ukko.fi](http://www.ukko.fi), <https://yrityksen-perustaminen.net/kevytyrittajyys/>

Macluumaad dheeri ah:

<https://www.ukko.fi/>

<https://op-kevytyrittaja.fi/>

<https://omapaja.fi/>

<https://www.eezy.fi/>

<https://odeal.fi/>

## Isku tagga saamilayda

Isku tagga saamilayda marka ad ku jirto waxa kuu suuro gal ah inaad la shaqayso xubnaha kale ee ka tirsan isku tagga saamilayda. Haddii ganacsiga ad ku jirtaan uu guulaysto xubnaha dhamaantood waxay helayaan faa'idada. Isku tagga saamilayda waxa aasaasi kara hal qof ama dhowr qof, shirkad ama bulsho kooban. Isku tagga saamilaydu waa si fiican oo ay qoysku u wada shaqaysan karaan. Sidoo kale isku tagga saamilaydu waa si fiican oo ay shirkado badan u wada shaqaysan karaan. Waxa kuu bannaan inaad ka qaybqaadato isku tag saamilay oo hore loo aasaasay amama in aad adigu aasaasato mid kuu gaar ah.

### Aasaasidda isku tagga saamilayda

- Isku tagga saamilayda qaabka loo aasaaso waa in ay saxeexaan xubnaha ka tirsan oo dhan heshiiska lagu aasaasayo isku tagga saamilayda.
- Xubinta ka tirsan isku tagga saamilayda waa in ay bixisaa saamida xubinta lagu noqonayo.
- Xubnuhu si wada jir oo ay garbo siman ku yihiin ayay go'aan uga qaadanayaan arimaha, yaga ayaana dooranaya guddiga maamulaya isku tagga saamilayda.
- Isku tagga saamilayda waa in loo sameeyaa sharciyo ay ku wada dhaqmaan.
- Xubnaha waxa u bannaan inay iska casili karaan isku tagga saamilayda haddii ay rabaan.
- Isku tagga saamilaydu waxa ay tahay in uu tix galiyo xeerka ay dowladdu u dajisay isku tagga saamilayda iyo sharciyadda ay dhexdooda wada samaysteen.
- Isku tagga saamilaydu waa shirkad maas'uuliyad buuxda aynan ka saarnayn xubnaha iska leh. Taas micneheedu waxa weeyaan in aanay tusaale ahaan mas'uuliyad ka saarnayn daymaha isku tagga saamilayda.

Warbixin dheeraad ah waxad ka heli kartaa bogga internetka ee Osuustoimintakeskus Pellervo:

<https://pellervo.fi/tietoa-osuustoiminnasta/>

<https://pellervo.fi/english/>

<http://perustajanopas.pellervo.fi/>

Soo xigasho: Osuustoimintakeskus Pellervo

### Isku tagga saamilayda iyo taakulaynta shaqo la'aanta

Fiiro gaar ah u yeelo, in shaqada ad ka qabanayso isku tagga saamilayda ay saamayn ku yeelan karto taakulaynta shaqo la'aanta. , että osuuskunnan kautta tehtävä työ voi vaikuttaa saamaasi työttömyysturvaan. . La talinta arrimaha taakulaynta shaqo la'aanta ee xafiiska shaqada waxad ka heli kartaa (tel. 0295 020 701, waxa la heli karaa isniin-jimce saacadda 9–16.15) la talin ku saabsan xaaladaada gaarka ah saamaynta ay ku leedahay taakulaynta shaqo la'aanta.